



Talada Miisaamidda Isqorista iyo Barnaamijka Dugsiyada Southeast ee Loo Soo Jeediyeey Guddiga Janaayo 12 keeda

Janaayo 7, 2021

Bulshada PPS ee Sharafta Leh,

Maadaama oo aanu bilaabayno 2021, waxa aanu doonaynaa in aanu ku siino warkii u dambeeyey ee shaqadii la dhamaystiray ee hannaankii miisaamidda isqorista iyo barnaamijka. Diseembar 17, [Isbahaysiga Hagidda Southeast](#) (SEGC) waxa ay qabatay kulankii u dambeeyey ee shaqadii Marxaladda 1 aad kaas oo diiradda lagu saarayey fasallada dugsiyada dhexe waxa aanay dhamaysay talooyinkeedii.

Talooyinkan waxa Guddiga Waxbarashada usoo jeedin doona Ku Xigeenka Kormeerka Claire Hertz kulankooda Janaayo 12. Talooyinka waxa ku jira xad imaanshiyaha ah iyo layliska barnaamijka labada luuqadood ee Dugsiyada Dhexe ee Kellogg, kaas oo ay tahay in uu dib u furmo dayrta 2021. **Qodobada muhiimka ah waxa kamid ah:**

- Barnaamijyada jaarka ee **Arleta, Marysville** iyo **Lent** waxa ay iska beddeli doonaan qaabkooga hadda ee xannaanada-illaa-fasalka 8 aad (K-8) waxana ay isku beddeli doonaan qaabka xannaanada-illaa-fasalka 5 aad (K-5). Ardayda ku jirta fasallada 6-8 ee dugsiyadan waxa loo wareejin doonaa Dugsiyada Dhexe ee Kellogg laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2021-22. Barnaamijyada K-5 ee dugsiyadan waxa ay noqon doonaan dugsiyo hoose oo ardaydoodu si toos ah ugu gudbaan Kellogg.
- Barnaamijyada isdhexgelinta labada luuqadood (DLI) ee Isbaanishka ee **Lent** iyo **Bridger** waxa ay iska beddeli doonaan K-8 waxayna isku beddeli doonaan K-5. Ardayda ku jirta fasallada 6-8 ee barnaamijyadan waxa ay u wareegi doonaan barnaamijka DLI ee Kellogg laga bilaabo 2021-22. Barnaamijyada K-5 waxa ay ardayda u gudbin doonaan Kellogg.
- Barnaamijka DLI ee Isbaanishka ah ee Dugsiyada Dhexe ee **Mt. Tabor** waxa uu u wareegi doonaa Kellogg 2021-22.

Kadib marka Guddiga Waxbarashada loo soo jeediyo talooyinkan, SEGC waa ay kulmi doonaan, haddii loo baahdo, taariikhdu marka ay tahay Janaayo 14 si ay uga jawaabaan codsi kasta oo Guddiga ka yimaadda. Guddigu intaa kadib waxa ay u codayn doonaan in ay ansixiyaan talooyinka kulankooga Janaayo 26.

Qaabab isqoris iyo arday-wareejin oo jira oo dhawr ah oo ka jira Southeast Portland sidooda ayey ahaan doonaan 2021-22. Isbeddelada dugsiyadan iyo barnaamijyadan waxa la fulin doonaa Marxaladda 2 aad ee shaqada SEGC taas oo bilaabmi doonta bishan Febraayo waxana diiradda la saari doonaa qaababka arday-wareejinta PK-5. **Marxaladda 2 aad inta ay gaadhayso waxa kamid ah:**

- **Harrison Park** K-8, kaas oo loo beddeli doono dugsi dhexe 2022, iyo **Creston** K-8, kaas oo isku beddeli doona K-5 2022.

- Wadada arday-wareejiyaha Dugsiga Hoose ee **Atkinson**, kaas oo sii ahaan doona mid u khaas ah Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor 2021-22.
- Dhammaan xadadka imaanshiyaha ee K-5, oo ay la socdaan goobaha iyo qaabaynaha barnaamijka DLI ee K-5 DLI, waa la tixgelin doonaa--laakiin fadlan ogow waxa ay noqon doonaan kuwo aan la beddelin 2021-22.

Maadaama oo **Creston** ay sii ahaanayso K-8 illaa 2022, SEGC waxa ay dalbadeen in saraakiisha degmadu ay sameeyaan dedaal ay diiradda ku saarayaan si ay u taageeraan ardayda Creston ee 6-8 si ay u xaqiijiyaan khibrad xooggan illaa goobteeda dugsiga dhexe la hirgalinayo 2022. Sidoo kale, SEGC waxa ay ogaadeen in wareejinta barnaamijka 6-8 DLI ee Isbaanishka ah ee **Bridger** ee loo wareejinayo Kellogg dayrta 2021 ay u baahan doonto goob ka beddelid ku meel gaadh ah barnaamijka jaarka 6-8 ee dugsiga maadaama oo uu aad uga yaraan doono in uu laf ahaantiisa u jiro. Xubnaha isbahaysigu waxa ay soo jeediyeen Harrison Park K-8 iyo Kellogg inay u noqdaan goobo muddo kooban oo suuragal ah ardayda 6-8 ee Bridger 6-8. Waxa ay dalbadeen in PPS ay la shaqayso qoysaska dugsiga dhexe ee Bridger si ay u hesho xal.

Diiwaanno dhamaystiran oo ah qoraalladii, soojeedinihii, linkiyadii iyo muuqaalladii kulanka SEGC si jawaab-celin loo bixiyo ayaa diyaar ku ah [websiteska Miisaamidda Isqorista iyo Barnaamijka PPS](#). Sidoo kale jawaab-celin ayaad bixin kartaa adiga oo adeegsanaya [foomka Jawaab-celinta Bulshada SEGC](#).

Mahadsanid.